



Federal Republic of Somalia
Office of the President

**XEER MADAXWEYNAHA Lr. 08
KALA DIRIDDA GOLAHA ADEEGGA GARSOORKA**

Taariikh: 11/03/2015

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobbada 4aad iyo 87aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ah;

MARKUU ARKAY: Qodobka 143aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ah

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo in la dhiso gole adeeg garsoor oo waafaqsan Qodobka 109A ee Dastuurka

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 28 ee soo baxay 8/7/2014 ee Dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka

MARKUU TIXGELIYAY: Cabashada Joogtada ah dadweynaha ee cadaadaalad darrada baahsan.

MARKUU TIXGELIYAY: Danta guud ee Cadaaladda

Wuxuu Xeeiriyay

Qod. 1aad

Laga billaabo taariikhda uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkan waxaa la kala diray Golaha Adeegga Garsoorka ee aan dhismihiisu waafaqsaneyn Dastuurka Kumeelgaarka iyo Sharciga Dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka.

Qod. 2aad

Xeerkan ma saameynayo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo iyagu xafiis ahaan uga mid noqonayo Golaha Adeegga Garsoorka.

Qd. 3aad

Xukuumadda iyo Golaha Shacabka waa in ay si deg deg ah u soo dhampaystiga dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka.

MUQDISHO: 11/03/2015



**MADAXWEYNAHA J. F.S.
MUDANE XASAN SHEEKH MAXAMUUD**